**Flüchtlingsrat Brandenburg**
Rudolf-Breitscheid-str.164
14482 Potsdam
Tel:0331-716499
Fax:0331-887-15460
info@fluechtlingsrat-brandenburg.de

www.fluechtlingsrat-brandenburg.de

www.redisendzpflicht.info

# Dacwada Dablin - Maxaa lagasameynkaraa?

Sharciga Dublin waxuu oranayaa: Wadanki ugu horeeyo oo katirsan Yurub( EU ) ee Faro kaaqaado ama aad Viso kasoo qaadatid,wadankaas ayaa ku shaqaleh arimaha Qaxootinimadaada .Ka soo qaad hadii Faragahaaga ku rajiister gareysanyiin ama Fara kaa yaaliin sida Talyaaniga.Hangari.ama Polan sida uu sharcigu dhigayo waxey isku dayeysaa Dowlada Jarmalka in dib laguugu celiyo Wadanki aad katimid- mararka qaarkood iyadoon Faro lagaa helinin ey isku dayaan in isbuucyo ka dib eey kuu soo diraan warqad sharciyeysan oo ku jirto Bashqad (jaalo ah ama hurud )ah ooay ku qorantahay in lagu celinayo wadanki ku qabilsanaa sida (Talyaniga Hangari iwm ) eeyna ku ogolaadeen in ey dib laguugu celiyo.Tariiqda ku qoran Bashqada dusheeda waa muhiim,laga bilaabo Tariiqdaas 6 bilood gudaheed ayeey heysataan dowlada in ey dib kuugu celiso.Hadii ladhaafay taariiqda balanta; waxaa qasab ku ah dowlada jarmalka in dacwadaada qaxootinimo inta lagu furo.

## Sharcigee looga hortagi karo cadeynta Dublin

Hadii ey warqada (jaalaha ama hurudka) kuugu timaado Haayka ama Gurigaaga **(waa muhiim inaad ogaato taariiqda ku qoran Bashqada** )laga bilaabo tariiqdaas waxaad heysataa hal Isbuuc oo waqti ah inaad kaga Dacwootid.Sidaas darted waa muhiim inaad Postadaada ogaatid,aqrisid marwalbo hadaad badashid adareeskaaga waa in aad la socodsiisid Bundesamt/Ausländerbehörde adareeskaaga cusub hadii aad lacala haayka kaguurtid.Hadii aad rabtid inaad kadacwootid cadeynta Dublin.Waa inaad sida ugu dhaqsaha badan in aad (Abuukato ama Loyar)ku qabsatid ama aad ku raadsatid meelha dadka lagala taliyo.

Dacwada ka hortagida dib ucelinta in kastoo ey tahay badanaa wax aan rajo saas u weyneyn lahey.Hadana Abuukatayashu waxey isku dayaan in eey ilaa xad eey kuu soo dhiciyaan in ey magangalyo ka hesho Dowlada iyo Maxkamadaha.

Meelaha dadka lagala taliyo waxey kaa caawin karaan in aad heshid in ey kula raadiyaan in aad heshid Abuukaato yaqaano shaqada,Si kastaba ha ahaatee waa in aad ka hadashid wixii aad la kulantay ama kugu dhacay oon caadi ahay tariiqda wax kugu dhaceen oo tafatirin oo lagu fahmi karo hadii wax la gugu sameeya wax ka baxsan xaquuqul insaanka hadii lagu jirdilay ama faraxumeeyay wadankaagi hooyo ama inti aad ku soo jirtay jidka tahriibka,hadii aad xanuunsantay ,hadaad leedahay caruuryaryar hadaad xaamilo tahay ama maskaxdaadi caadi ahey hadii uu dad kamid ah famaligaaga inta horay ugu noolaa ooy dowlada qalad sameysay waa waxaan badanaa dhicin.Xataa waa in aad ka hadashaa nolosha wadanki aad ka timid oo katirsan yurub waxaa laga yabaa in uu muhiin yahay ma ku heysatey Hooy ama Dhaqaalo Caawinaad,Caafimaadka daruuriga in lagaa caawiyo ?

Hadii ey macquul tahay qor wixii aad kal kulantay marki lagu celinayay iyo marki lagu celiyo kadib usoo dir qoraalkaas Abuukatahaaga ama meeshi lagala talinjiray.waxa laga yabaa in ey mustaqbalka ku caawiso! Mararka qaarkood wey fiicantahay in aan wadatid Mobeylka gacanta in aad kala xariirto meelihi lagaa caawini jiray si aad caawinaad uga heshid

## Waxaa wax laga xumaado ah iyadoo aan lagu socodsiin in layku dayo in diblaguu celsho

Ma isku dayday Ausländerbehörde,in ey ku celiso,.adoon balan lagula soo socodsiin waa wax dhici kara,adigoo Guriga kamaqan.Adoon ogeyn balantaas, maqnaashahaaga laguma qabsan karo.Waxaad xaq u leedahay in lagula socodsiiyo waqtiga lagu celinayo

## Maxaan kale oo aan sameyn karaa?

Mararka qaar waxaa dhacdo in ey dowdada u suurti gali weyso in 6 Bilood gudahood lagu celiyo ama in ey jirto sababa kale dartood uu celiska u suurta gali waayo.

## . ogeysii dadka arimahaa kuu gaarka ah

Haduu ku haayo xanuun cilmi nafsi ah, istrays, uur leedahay,caruur yaryar leedahay aad xanuunsantahay,iwm taas macnaheedu hadaad u baahantahay magangalyo celiska waxuu noqonayaa mid aan suurta galeyn aheyn ogeysii Abuukataha dowlada ka soo cadey Dhaqaatiirta cudukaaga ama uurkaaga kasoo cadeey Dhaqaatiirta cilmi nafsiga istareykaga.Ilaa daqiiqada ugu danbeyso waad tusi kartaa warqadaha cadeynta boliiska iyo waaxda socdaalka eraboorka.Horey ma u xanuunsatay Dhaqtar ma lagu dhigay ama

Manakoobiyo malagu geeyay ,halkaas lagaama dhoofin karo.

## .Ma tihid kaligaa!

Sharciga dublin waxuu qabtay dad badan oo qoxooti ah.Isku xirnaada ka hadla arimihiina.Dib u celinta.Celitaanka qaarkiis ma masuurta galeyso,sababta oo ah in eey diidaan dadlka oon ogolaanin in lawado.Markaas oo kale waxaa fiican in eey dadka kale caawiyaan

.

## .Weydiista caawinaad Dariska

Laxariir Ururada ku yaalo meelaha kuu dhow magaaladaada,dadka isku xilqaamiyay iney u mudaaharadan ,Dariska wey awoodaan in ey joojiyaan celiska.Dad badan ayaa ka soo horjeeds sharciga Dublin oo u arka wax ka baxsan bani aadanimada oo diyaar u ah in ey kuu istaagaan.

## .Celitaanka in laga dhigo mid dadka oo dhan la ogoysiiyo

Mataqaan balanta lagu celinaayo,ogeysii dadka oo dhan oo raadso caawinaad ururada dadka caawino,meelaha dadka lagala taliyo.Badanaa ka soo qaad hadii la wada ogyahay dhoofitaanka waxaa hor istaaga waaxda socdaalka Ayraboorka!

## .Xaqa aad leedahay Diyaarada dusheeda

Hadii ey dhacdo in diyaarad lagugu celiyo,waa in aad ogaatid in baayloodka diyaarada uu kataliyo kaligiis,kama taliyaan boliiska ama dad ushaqeeyo dowlada:Sanadki la soo dhaafay waxaa dhacday in uu nin lacelinayay uu ogeysiiyay nin kamid ah rakaabkii diyaarada uuna u sheegay in asaga oon raali ka ahayn la celinaayo.qof ka mid ah rakaabka ayaa ayaa diiday in fariisto halkaa waxaa ka dhacay in diyaarada la kicin waayay sidaas darteed celitaanki waa la joojiyay.

## Meelaha kale oo ka heli kartid caawinaad Berlin iyo Brandenburg

Kulanka Aktionsbündis oo ka soo horjeeda dublin: 2 ama 4 Isniinba mar sacada markey tahay 16:30,4:30,galabnimo meeshuna waa BBZ Turmstr.72,Berlin meshaas waxaa lagu diyaariyaa mudaaharadyo looga soo horjeedo sharciga Dublin waxaa leyku dhaafsadaa wixii qibrado ah waxa badanaa jooga dad kula talinaya oo ku siinaayo talada ugu horeyso ama kuu gudbinaayo cid ku sii caawiso

**Buuga Adareesyaday Brandenburg** ayaad ka heli kartaa meelaha lagala taliya dadka,Isbitaalada ,Isbitaalka madaxa (manakobiyada ) iwm.dadka yaqaan luqadahaan (Jarmal,Ingriis,Ruush,Fransiis,Carabi,Serbi,Farisi )http://www.fluechtlingsrat-brandenburg.de/tipps-fur-den-fluchtlingsalltag/adressen-fur-b

esonders-schutzbedurftige-fluchtlinge

Halkuu yahay fadhiga maamulka qabilsan qaxootiga Bilwalba Arbacada udanbeysa saacda markey tahay 16:30.4:30 galabnimo fadhigoodo waa mid siyaasada isku xira, maqabaan meel dadka lagala taliyo hadaan badelno waxa laga hadlaayo, waxa laga hadlayo waa sharciga dublin iyo Qoxootiga ku soo badanaayo Yurub